**Sharci lamba. 26 ee 28 Disember 1965**

**Wax ka Beddel Sharciga lamba. 15 ee 16 November ee la Xiriira Canshuurta Macaashka ee Jamhuuriyadda ee lagu Fuliyey Sharciga lamba. 3 ee Febarayo 1963.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la garawsaday Oggolaanshaha Golaha Wasiiradaha;

**WAXAA LA SOO SAARAY**

Sharciga halkaan ku qoran:

**Qod. 1**

Qodobka 13 ee Sharciga lamba. 15 ee 16 Nofember 1957 oo khuseeya canshuurta macaashka, oo dalka Jamhuuriyadda lagu hirgeliyey sharciga lamba. 3 ee 19 Febarayo 1963 waxaa la beddeley sida soo socota:

Waxaa laga reebay canshuur:

a) Dowladda iyo Dowladaha Hoose;
b) Wakaaladaha iyo hey'adaha caalamiga ah sida ku carifan xeerarka caalamiga oo guud ahaan la aqbalay iyo heshiisyada caalamiga oo xeerineyso Jamhuuriyadda Somaliya;
c) Xubnaha Diplomasiinta ee dowladaha dibedda, mushaaraadka iyo gunnoyinka ay helaan howlaha la xiiira howlahooda;
d) Xafiisyada Qunsuliyadaha ee dowladaha dibedda, mushaaraadka iyo gunnoyinkii la xiriira howlahooda;
e) Saraakiisha iyo shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo hey'aadaha gaar ah ama hey'adaha caalamiga ah sida ku qoran heshiisyada caalamiga , mushaarkooda iyo gunnoyinka howlahooda la xiriira;
f) Militariga iyo ciddii u dhigmata militari oo ku howlaan adeeg hoose oo ka hooseeyo darajada sarkaal ku xigeen;
g) Hey'adaha, iyo machadaha qeyriyaadka fuliyo oo si sharci ahaan loo dhisay, akademiyadaha iyo hey'adaha ujeedadoodu tahay keliya mid dhaqan ah markii laga reebo markii daqligood uu ka yimaado ganacsi;
h) Hey'adaha, machayada iyo shirkadaha haysata ruqsooyinka batroolka iyo macdanta oo heshiis shaqada ku saleeysna mi si sharci ah lagu aqbalo haddana lagu dabaqo canshuur guud ee mushaarka.

**Qod. 2**

Qodobka 14 waxaa loo beddeley sida soo socota:

Waxaa ka reeban canshuurta:

a) Dhismooyinka loogu tala galay fulinta diinta iyo shaqaalahooda;
b) Qabuuraha iyo shaqaalahooda;
c) Dhismaha dowladda;
d) Dhismoyinka loogu tala galay Safaaradaha, Qunsuliyahada markii uu dowladda leedahay oo ay wakiil ka yahay;
e) Dhismaha loogu tala galay dugsiyada xatta kuwa si gaarka loo leeyaha oo aan loogu tala galin in macaash suubiyaan oo Wasaaradda Waxbarasha ay oggolaatay;
f) Dhismooyinka ay Qaramadda Madoobe iyo Hey'adaha u gaarka ah ama hey'adaha caalamiga ah sida ku xeeraan heshiisyada caalamiga ah;

g) Macaashka hantida la dhigtay boostada.

**Qod. 3**

Qodobka 15 waxaa lagu suubiyey isbedel sida hoos ku qoran:

Waxaa ka reeban canshuur dhismooyinka miyiga oo ciddi iska leh ay ku suggan tahay marxaladahaan hoos ku tixan:

a) Dhismooyinki nagu nool yahay beeraha dhexdiis si loogu shaqeeysto kuwaas oo qiimahoodu ka badneyn So.Sh. 10,000;
b) Xoolaha ku nool dhul beereedka iyo kuwa loo baahan si dhulka loo beero;
c) Keydka iyo farsamada dalaga beeraha iyo qalabka oo loogu tala galay beeraha.

**Qod. 4**

1. Qodobka 16 ee isla sharcigasi ee la xiriiray ka reebinta guud iyo midka barka ah ee dhismooyinka cusub, ballarinta iyo sare u qaadista dhismooyin horay u jiray waa la buriyey;
2. Hantileyaasha loo oggolaaday reebinta canshuurta waxay waajib ku noqon doonta bixinta 1da Janaayo 1966.

**Qod. 5**

Qodobka 17 waxaa loo beddeley sida hoos ku qoran:

1. Wasiirka Maaliyada wuxuu si khaas ah uga reebi kara bixinta canshuurta macaashka si guud ah ama bar-bar warshadaha iyo shirkadaha beeraha ilaa iyo muddo aan ka badneyn 10 sano;
2. Ka dhaafidda canshuurta waxaa loo oggolan karan oo keliya kadib markii hantiluhu muujiyo in khataro badan ay wajahayaan iyo in canshuurta laga dhaafay ay dhalin doonto qabaab cusub ee wax soo saar ah oo horay aan loo isticmaalin;
3. Ka dhaafidda canshuurta macaashku waxaa kale oo loo oggolan kara haddii la mujiyo in inkasto aysan ka caawimi doonin dhinaca wax soo saarka, waxay wax ka tari doonta sare u qaadka qiimaha dhaqaale ee shirkadda;
4. Haddii shirkaddu muujiyo in ay waddo qorshe ballarin howlaha ama dib-habeyn cusub waa laga dhaafi doonaa canshurta haddii ay ku sifoowda marxaladaha ku qoran faqradaha 2 iyo 3;
5. Ka dhaafidda canshuurta waa loo oggolan kara shirkad waddo shaqo ama isla wax soo saar qabato ee shirkad horay loogaga dhaafay. Waxaa loo ogolan doona ka dhaafidda la mid ah midda shirkada waxayna ka dhici doonta isla muddada shirkadda kale la siiyey;
6. Ka dhaafiddu waxay ku eg tahay 10% handida lagu maal geliyey waxaa loo fassax ilaa iyo intii hantida la geliyey laga soo celiyo;
7. Shirkadaha cusub ee sida ku xusan qodobka 17 ee sharciga 15 ee 16 Nofember 1957 oo laga reebay bixinta canshuurta macaashka waxay yeelan doonaan fursadasi muddo 10 sano laga bilaabo maalintii ay howl galeen wuxuun khuseyn doona oo keliya 10% hantida la maal geliyey.

**Qod. 6**

Qodobka 18 waa la buriyey gebi ahaantiis.

**Qod. 7**

Qodobka 23 waxaa loo beddeley sida hoos ku qoran:

Macaash dhismooyinka ku tilmaamn lamba, 6 ee qodobka 8 waxaa la xisaabiyey kadib markii laga reebo macaash guud xisaabta u dhiganta 20% ee ils macaashkaasi taas oo loogu galay dib-u-habeynta ama wixii kharaj ah oo dheerad ah.

**Qod. 8**

Qodobka 24 waxaa lo beddeley sida soo socota:

1. Waxaa reeban in laga jaro:
    1. Kharaj gaarka ama reerkaaga;
    2. Wixii ka dhumay - kadib markii laga reebo marxaldda ku qoran qodobka 21-, ka jaridda, kala bixida hanti, xoolaha loogu tala galay maal gashi;
    3. Hantida dhunta iyo kharajka la soo celiyo sida caymiska, heshiisyada iyo gunnoyinka;
    4. Kambiyaalaha dhismooyinka oo aanan wax soo saarka loogu tala gelin;
    5. Macaashka hantida malgashiga la geliyey;
    6. Magdhaw mushaarka, midka xaaska, kuwa ilmaha iyo kuwa waalidk, qaraabada ilaa darajada 3aad oo la deggen mushaarlaha;
    7. Magdhawga maamulka shirkadaha iyo hey'adaha canshuurta ku waajibsan.
2. Shirkada leh shaqsi qanuun waxay yareyn karaan macaashkooda ilaa 40% hantida kaas oo misaaniyada ka badanin 25% ee macaashka la canshuuraya;
3. Wixii dhigaal ah oo aan la qeybinin oo la dhigo keyd sida ku qoran faqradda sare waxaa la canshuuri doonaa ilaa iyo 40%.

**Qod. 9**

Qodobka 31 ee isla sharcigaasi waxaa loo beddelay sidatan:

Macaashka hantida maguurtada ee dhismooyinka sida ku xusan Qod. 8 lamba. 6 iyo Qod. 23 laguma dari karo mashaac nooc kale ah waxaa la canshuuri doona sida heerka hoos ku qoran laga bilaabo 1 Janaayo 1966:

— ilaa Sh.So. 30.000 ee 15%;
— wixii ka badan Sh.So. 30.000 ilaa iyo 22.50%.

**Qod. 10**

Qodobka 32 ee isla sharcigaan waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran:

Canshuurta macaashka guud ahaaneed ee 1,2,3,4, iyo ee qodobka 8 waxay yeelan doonaan canshuurta laga bilaabo 1da Janaayo 1966 sida heerkaan dhigaayo

1. Canshuurta laga rabo qofka shaqsiga ah:

| | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Mushaarka ilaa Sh.So. | | | | 2.400 | | | | | Canshuur la'aan |
| Wixii ka badan | | | Sh. | So | 2.400 | ilaa | Sh.So | 3.600 | heer 9% |
| " | " | " | " | " | 3.600 | | " | 4.800 | " 11% |
| " | " | " | " | " | 4.800 | | " | 6.000 | 13% |
| " | " | " | " | " | 6,000 | | " | 7.200 | 15% |
| " | " | " | " | " | 7.200 | | " | 8.400 | 17% |
| " | " | " | " | " | 8.400 | | " | 9.600 | 19% |
| " | " | " | " | " | 9.600 | | " | 10.800 | 22% |
| " | " | " | " | " | 10.800 | | " | 18.000 | 25% |
| " | " | " | " | " | 18.000 | | " | 30.000 | 28% |
| " | " | " | " | " | 30.000 | | " | " | 30% |

Canshuurta laga rabo shaqsiyada qeynuuni ah oo hanti kasta leh waa heerka 28%

**Qod. 11**

Qodobka 33 ee isla sharciga waxaa loo beddeley sidatan:
Laga bilaabo 1da Janaayo 1966waxaa la saaray canshuur dheerad ah oo loogu daneynaaya maamulada dowladaha hoose oo u dhigmata 6 u dhig canshuurta macaashta.

Canshuurta dheeradka waxaa laga dhigay 20 u dhig qeyn howlaha ku qora lambar 7 ee qodobka 8.

Lama kala go'in karo canshuurta Toosan iyo midka dheeraadka ah.

Xafiiska canshuurta Toosan iyo midka dheeraadka ah ee maamulada dowladda hoose waxaa lagu shubi doona qeybta laga fuliyo howlaha ay canshuurtu ku waajibtay.

**Qod. 12**

Qodobada 54 iyo 56 waxaa loo beddeley sida soo socota:

1. Qeybta canshuurta ee darajada 1aad waxaa iska leh qeybaha canshuuraadka ee Maxkamada Gobolka oo ka kooban Guddomiyaha Maxkamadda iyo laba Garsoore canshuuraha iyo kuwa beddela;
2. Qeybta canshuurada ee darajada 2aad waxaa iska leh qeybta canshuurta ee Maxkamadda Racfaanka waxayna ka kooban tahay Guddomiyaha Maxkamadda Rafcaanka, 4 Garsoore iyo 2 beddel ah;
3. Garsooraha canshuur ee qeybaha Maxkamadda Gobolka iyo Maxkamadda Rafcaanka waxaa laga soo saaro keydka 2dii sanaba laga soo saaro dekreeto Wasiirka Maaliyadda;

Bilaabka sanad kasto Guddomiyaha Guddiyada waxay soo saaran Garsoorayaasha iyo kuwa lagu beddelo. Haddii uu Guddomiyaha maqan yahay waxaa lagu beddeli karaa sida faqradaha sare Garsooreyaasha canshuurta;

4. Garsooraha canshuurta waxay leeyihin awoodaha Garsooraha Maxkamadda Assise.

**Qod. 13**

Qodobka 68 waxaa laga beddeley sida soo socoto:

1. Kadib markii marxaladah ku qoran cutubka 7aad, canshuurta macaashka waxay noqon doonta sida ku qoran qod. 25;
2. Adeega Horumarinta Bulshada ee Wasaarada Arrimaha Gudaha waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha. Canshuurta waxaa la saari doona kadib markii la caddeyo ama la toosiyo kordhinta waxaa noqon doonta maalinta ku xigga 30 beri;
3. Haddii loo baahdo in la soo saaro caddeynta, qaadista lacagta waxaa la laali doonaa ilaa iyo intii la go'aamiyo oo xukunka noqdo mid rasmi sida ku xusan qodobka 46. Haddii Xafiiska Canshuurta Toosan uu si ku meel gaar ah uu damco in uu canshuur qaado waxaa uu qaadi kara kadib markii 30 ay ka soo wareegtay markii la toosiyey, heerka u dhigmada 50% ee canshuurta la caddeye, ururita waxaa loo fuliyaa habka lagu tilmaamay qodobka 70 iyadoon lagu dhaqmin xaqa uu qofku leeyahay;
4. Qaadista canshurta waxaa si toos u qaadi doono Xafiiska Canshuuraha ama Xafiiska degmada ee u qaabilsan;
5. Amarradda faqradaha sare ku susan waxaa lagu dabaqi doona kiisaska horyaal qeybaa Canshuurta iyo Maxkamadda Sare maalinta ay hirgasho sharcigaan.

**Qod. 14**

Qodobka 84 waxaa loo bedeley sida soo socota:

1. Waxaa iska awooda qaadista dembiyada ku qoran sharcigaa waxaa iska leh Maxkamadda Gobolka oo halka dembi ka dhacay;
2. Falalka dembi eek u qoran sharciga, xukun ciqaabto waxay caddeyn doono mid rasmi wajiibka canshuurta waa mid suggan;
3. Ciddi muteysata ciqaab ka timaado dembi maaliyeed oo si gaar ama ku meel gar ah loo ciqabi sida ganaax ama mas'uuliyaada falalka dembiga idaariga ah oo aan ahan mid ciqaab ah, waxaa loo ogol yahay in 15 beri gudahooda uu bixiyaa lacag u dhigmata 6 meel ganaaxa lagu xukumay ama ciqaabta idaariga iyo canshuurta dheeriga oo ku waajibtay;
4. Ciddii mas'uul ka ah falka dembi maaliyadeed oo aan xiirir la lahay sida faqradda sare waa in uu bixiya ka hor intii aanan la furin doonada lacag u dhigmata 3 u dhig ganaaxa lacageed ee dembi iyo canshuurta dheeraadka ah.

**Qod. 15**

Qodobka 88 waxaa loo beddeley sida hoos ku qoran:

Laga bilaabot 1 Janaayo 1966, mushaarka shaqada waxaa lagu canshuuri doona sida heerkaan:

| | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Mushaarka ilaa Sh.So. 2.400 | | | | | | Canshuur la'aan | | |
| Ka badan So. Sh. | | | 2.400 | ilaa | Sh.So, | 9.600 | heer | 6% |
| " | " | " | 9.600 | " | " | 18.000 | " | 12% |
| " | " | " | 18.000 | " | " | 30.000 | " | 18% |
| " | " | " | 30.000 | " | " | | " | 24% |

**Qod. 16**

Wasiirka Maaliyada wuxuu awood u leeyahay in ay soo saarto xeerar toosin doono canshuuradka dhismooyinka iyo dhismaha.

**Qod. 17**

Waxaa la buriyey:

a) Qodobka 94 ee Sharci lamb. 15 ee 16 Nofember 1957;
b) Dekreeto –Sharci lamb 4 ee 5 Maay 1960;
c) Xeer kasta eek a soo horjeeda ama khilaafaya sharcigaan.

**Qod. 18**

Dowladu waxay awood u leedahay in ay ku soo saarto ilaa iyo 31 Disember 1966 Dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyadoo la tixglinayaa Wasiirka Maaliyada kadib markii lala tashtay Golaha Wasiiraha, qoraal keliya ee la xiriira canshuuraada iyo xeerarka xeerinaya amarrada sharci ee cusub.

**Qod. 19**

1. Wax allaliyo wixii khuseeya canshuurta toosan ama canshuurta macaashka iyo xeerarka fulintooda ee Dekreetada lamba. 30 ee 24 Febarayo 1956 waxaa lagu dabaqii doona dhulka Jamhuuriyadda oo idil;
2. Fulinta rasmiga ee bixinta canshuurta waxaa soo saari kara hye'adda maaliyadeed sida ku cad qodobka 1 ee dekreetadan;
3. Caddenta qaabka loo fuliyey waxay ku cadahay qodobka 2 ee dekreetada iyadoo la gu qori doono meesha ugu hooseeya.

**Qod. 20**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, Faafinta Rasmiga ah.

Sharcigaan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee Shuruucda iyo Dekreetoyinka waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmia ee Jamhuriyadda Somaaliya.

Waxaa la faraaya in cid kasto ay u hogaansanaato sharcigaan, una hoggamiso cid kasto.

Muqdisho, 28 Disember 1965.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Maaliyadda
**Awil Haji Abdullahi**